

OGEYSIIS SHAQAALE:

U-qalmitaanka Dheefaha Caymiska Shaqo La'aanta

- Haddii shaqaaluhu ay shaqada ka tagaan iyagoon haysan sabab macquul ah, uma qalmaan dheefaha caymiska shaqo la'aanta.
- Caymiska shaqo la'aanta waxaa loogu talagalay kuwa shaqada laga joojiyo iyagoon samayn wax khalad ah.
- Ka tagista shaqada sababo la xiriira shaqo ka joojinta soo fool leh guud ahaan looma arko sabab macquul ah oo lagu joojiyo shaqada sida sharciga waafaqsan.
- Haddii shaqaale lagu meeleeyo xaalad shaqo joojin oo ku meelgaar ah ama fasax shaqo, kadibna uu diido codsiga shaqo-bixyahahooda ee ah inuu shaqada ku soo laabto, shaqaaluhu guud ahaan uma qalmo dheefaha shaqo la'aanta.
- Ku gudbi sheegashada barta [NEworks.nebraska.gov](https://www.nebraska.gov/ne-works) marka shaqadaadu dhammaato, ma ahan kahor.